



Dabaal deggii maalinta 1da-juuliyo 2010 iyo qalin jabintii ardeyda dugsiyada sare ka dhamaysey magaalada Århus 3/07-2010

Ujeedooyinkii loo qabtay

Waxaa magaalada Århus ee Dalka denmark ka dhacay shirweyne lagu maamuusayey 50 sano guuradii ka soo wareegtay maalintii ay Soomaaliya ka qaadatay xoriyadda gumaysigii xukumijirey.

Sideynu wada ogsoonahay waxaa soo maray Africa gumeysi muddo dheer ku habsadey oo ka tegey waddamadii ugu tabarta iyo tunka nooraa ee adduunka ku amar kutaaglbynayay xiligaasi. Gumaysigaas ayaa aha amid xoog iyo amar kutaaglbynayay qabsadey xiligaas, isla maantana jira laakiin siyaabokale loo bedelay.

Haddaba Soomaaliya waxay ka mid ahayd waddamadii reer afrika ee lagaga soo duulay saddex dhinac oo ay ka la ahaayeen gomaystayaashaas: **Italy, Britain** iyo weliba **France**.

Gumaystahaas ayaa waxaa ka gilgishay dadka soomaaliyeed ee maanta loogu yeero xornimo udirkii soomaaliyeed oo gaashaanka ku dhuftey gumaysigii illaa ay ka saareen dalka oo dhan. Inkasta oo ay jireen kuwo garabsiinayay gumaysiga soomaalina sheeganayey.

Waxaa marka xusid mudan oo ummada soomaaliyeed markasta udabaal degijirtay maalintaa taariikhiga ah ee soo martay ummadda soomaaliyeed. Inkasta oo laysweydiinkaro jiilalkii ka dambeeyey kuwii xoriyadda dhaliyey xagee bay kufureen xoriyaddii loo keeney?, oo maxaa udambeeyey xoriyaddii?, haddana weli waxaad arkaysaa dad farabadan oo aduunka daafhiisa ka xusayaa oo udda baal degaya maalintaa.

Waxaa isna maamuuskaa (xafladaas) ku lifaaqnaa oo isku mar la qabtay si hal dhagax labo shimbirood loogu dilo, xafladdii qalin jabinta ee ardeydi ka baxdey sanadka 2009/2010 dugsiyada sare ee magaalada, Århus denmark.

Waxaa aad iyo aad muhiim ah inay dhanta iyo dadka waaweyniba kafaaiideystaan fursadaha qaaliga ah ee ina soomaraya ee aynaan ka helikaray meelihii aynu ka nimid. Fursadahaas ayaa waxaa ka mid ah tan waxbarasho, shaqo iyo horuminta maskaxda ummaddin.

Sidaas daraadeed waxaa soomaalida Århus deggani sanadihii dambe aad ugu bararug sanaayeen dhalinta iyo dhinaca waxbarashada oo xaflado sidaas oo kale ah lagu gudoonsiinayay shahaado sharafyo iyo hadiyado dhalinta waxbarashada dhamaysa.

Waxaa dhalinta halkas maalintaas lagu baraarujiyey inay dadaalkooda waxbarasho sii dhamaystaan kuna baraarujiyaan walaalohooda kale. Una noqdaan kudayasho fiican kuwa kale.

Inkasta oo tirada sanadkaan dhamaysay waxbarashada dugsiga sare ay san badnay ayaa hadda dadku aad ugu faraxsanaayeen dhalintaasi oo iyaga naftoodu wajiyadooda looga jeedey farxad.

Qabanqaabadii xafladda

Waxaa is xilqaan wanaagsan muujiyey oo ka qaybqaatay isku dubarididda xafladaas inay qab soomto dadka soomaaliyeed ee deggan magaaladda aarhus gaar ahaan ururada ku bahoobay Aarhusomali (www.aarhusomali.dk) oo ka koobnaa illaa 13 urur oo ka dhisan magaaladaas.

Waxaa kale oo ka qayb qaataay qaban qaabada xafladdaan siiba qaybta wax barashada : Xarunta lagala taliyo dhalinta dhinaca waxbarashada iyo shaqada ee Gellerup (*Vejledning center i Gellerup*).

Waxaa iyaddana xusid mudan inay helgelinta xafladdan kaqayb qaateen ganacsata soomaaliyeed ee magaalada Århus. Siiba dukanada iyo xawaaladaha **Bakaal iyo Amaana**.

Martisharaftii

Waxaa xafladdaan qiimaha badan lagu casumey dad ku takhasusey taariikhda , dhaqanka iyo hiddaha soomaaliyeed. Waxaa kale oo ka qayb qaataay oo haddalo qiimo badan iyo weliba murti ka soo jeedihey xafladdaan abwaano soomaaliyeed oo ku qeexay xoriyadda iyo qiimeheeda gabayo iyo buraanburo. Waxaa ka mid ahaa dadkii hadalada ka soo jeedihey xafladaas.

1. Aqoonyahan Khalid Ali Guul
2. Abwaan Bare Maxamed fiidoow
3. Caaqil Axmed Kaashe
4. Abwanad Hooyo Xaliima Soofe
5. Caaqil Muxiyaddiin Xassan Cali
6. Sh. Mohamed Gagaale

Iyo wuxu kale ba.

Marti shartaan ayaa waxaa kujiray dad taagnaa xilgii xornimadda la helay iyo kuwo ka soo qayb qaataay xornimo udirirkii.

Waxaa kale oo kelmedo gaaban kasoojeediyey xafladaas madax ka tirsan xisbiyada siyaasadda waddankan kuna jira golaha deegaanka ee degmada Århus. Madaxdaan ayaa carrabka ku dhuftay soomaalida iyo isku duubnaantooda iyo sida ay beryahaan dambe ula soo baxeen firfircoonaan aan ka muuqan ajnabiga kale ee ku dhaqan waddankan.

Xafladdan ayaa waxaa ka soo qaybgalay dad ad tiradoodu ubadan tahay oo aad iyo aad uqiireysnaa markii laga hadlay qaabkii soomaaliya xornimadda loogu soo celiyey.

Sawiradii shirka



Turkiya Wuxuu Turkigu fariistay iyo dhulka Soomaalida sannadki **1557**, Seylac Berbera iyo Harar, wuxu ka dib ku wareejey Masaarida sannadki **15/7/1874**
Bargash oo Cumaan ahii Wuxuu soo galay Banadir Banaadir ilaa Kismaayo **1807**, wuxu Talyaaniga ku wareejey **16/7/1896**
Masaarida waxay soo gashay dalka **15/7/1874**, waxay wareejisey Ingiriiska **7/7/1887**, waa isla sannadki Itobiya Harar Qabsatay.
Faransiiska wuxu Obokh salka la helay oo calankiisa ka taagey **30/4/1864**, wuxu haystey muddo **113** sano ah wuxu ka baxay Xorriyadi Jabuuti **1977**.
Ingiriiska wuxu Ingiriisku calankiisa ka taagey Seylac **20/7/1887**, wuxu haystey Ceelaayo ilaa Seylac ilaa la soo gaarey xorriyaddi **26/6/1960** wuxu haystey **86** sano.







Abdirahman M. Iidle Tlf. 27 28 52 57

Abdirashiid Sheikh Tlf. 28 50 31 90

